



CONSTRUCTION NOTICE

Noofambar 2021

Waxaan dhisaynaa hab cusub oo biyo-mareen ah si xaafadaha South Park loogu caawiyo fatahaadda

SHARAXAADA MASHRUUCA

Adeegyada Dadwaynaha ee Guryaha Seattle (Seattle Public Utilities) iyo Waaxda Gadiidka ee Seattle (Seattle Department of Transportation) waxay si wada jir ah uga wada shaqaynayaan mashruuca biyo mareenka ee loo yaqaan Iskaashiga South Park iyo Roadway **si loo hagaajiyo arimaha fatahaada iyo biyabaxa South Park.**

Waddooyinka waa la hagaajin doonaa, qaar ka mid ah waddooyinkii quruuruxda ahaa ayaa laga dhigi doonaa laami. Waddooyinka dhinaceeda iyo geedaha waddooyinka ayaa lagu dari doonaa meelaha qaarkood.

Mashruucani wuxuu ka caawin doonaa in la yareeyo fatahaada ayadoo la rakibaya tubooyin cusub iyo bullaacadaha si loo ururiyo oo si wanaagsan loo maareeyo biyaha dabaylaha (daadka biyaha roobka). Biyahan ayaa ugu dambayntii la rabaa in loo jihaynayaa saldhigga biyaha mustaqbalka si loogu hagaajiyo ka hor inta aan la gaarin marin-biyoodka Duwamish ee soo dhow.

Jadwalka

Dhismaha mashruucan waxa uu bilaabmay bartamihii bishii Oktoobar 2021. Dhismaha ayaa la filayaa in la soo gabagabeeyo dhamaadka 2022.



GOOBTA


Mashruucani wuxuu ku yaalaa Aagga Warshadaha ee South Park, inta u dhaxaysa 2nd Ave S iyo 8th Ave S, oo ku fidsan S Holden St iyo S Monroe St.

DADKA DEGAN SOUTH PARK, GANACSATADA, IYO SOCDAALKA AYAA FILAN KARO

- Dhismaha oo socdo Isniinta ilaa Jimcaha inta lagu jiro maalinta, laga bilaabo qiyaastii 7 subaxnimo ilaa 4 galabnimo.
- Sawaxanka dhismaha, wasakhda, gariirka, iyo qodista laamiga iyo saarista.
- Inay soo bataan gaadiidka dhismaha, agabka, iyo qalabka waaweyn ee aagga.
- Jidka mara guryaha gaar loo leeyahay in la dayactiro.

LA XIRIIR

Jason Sharpley, Maareeyaha Mashruuca,
jason.sharpley@seattle.gov, (206) 498-8734





CONSTRUCTION NOTICE

Noofambar 2021

- Waddooyinka baabuurta waxay u baahan karaan in la xidho wakhti gaaban inta uu dhismuhu socdo. Haddii loo baahdo, Adeegyada dadwaynaha ee guryaha Seattle iyo qandaraaslaha mashruuca ayaa isku dubaridi doona xidhitaanka mulkiilayaasha hantida.
- Gelitaanka magaalda ayaa loo dayactiray inta uu dhismuhu socdo dadka ku nool, ka shaqeeya, ama soo booqda aagga.

Bogga internetka ee bixinayso macluumaad dheeraad ah : www.seattle.gov/utilities/neighborhood-projects/south-park-drainage

LA XIRIIR

Jason Sharpley, Maareeyaha Mashruuca,
jason.sharpley@seattle.gov, (206) 498-8734



**Seattle
Public
Utilities**



Seattle
Department of
Transportation

